



CRS waxay ka caawisaa bulshada lagu hayo xiisad ama iskudhac ku saleysan naafanimu, ayadoo:

Siineyso saraakiisha nabad sugidda, kuwa ka shaqeeya, adeeggana bixiya sida ugu wanaagsan ee looga howgalo arritan si looga taxadaro in shaqsiyaadka naafada lagula dhaqmo xushmad oo looga hortago Isfahan waaga

Fududeynta la wadahalalka maamulayaasha, macalimiinta, iyo ardayda iskoollada iyo jaamadaha si looga xaliyo arrimaha saameynaya ardayda naafada ah, sida in la xumeyna ama la handado

Qabashada kulanno u dhaxeeya nabad sugidda, saraakiisha magalaada, iyo hay'adaha u dooda naafada si loo xaliyo xiisadaha ka yimid dambiyada naceybka iyo dhacdooyinka eexashada ku saleysan naafanimu

Adeegda Xiriirka Bulshada ee Wasaaradda Cadaaladda Mareykanka

Wax kaqabashada Iskudhac ku Saleysan Naafanimu

Si Loo Caawino Bulshada inay kahortagaan Kana Jawaabaan Dambi Naceyb ah ee La Xiriira Naafanimu Darteed

Adeegga Xiriirka Bulshada ee Wasaaradda Cadaaladda Mareykanka (loo soo gaabiyo CRS) waxay ka caawisaa bulshada inay wax ka qabtaan kana hortagaan dambiyada naceybka ah iyo xiisadaha ku saleysan naafanimu jirto ama midaan jirin. CRS waxay la shaqeysaa hay'adaha nabad sugidda, Saraakiisha gobolka iyo kuwa gudaha, kooxaha bulshada, ururrada xuquuqda rayidka, ururrada xuquuqda naafada, hay'adaha waxbarashada, iyo kuwa kale si ay uga gaaraan fahan guud arrimaha ku hareereysan isku-dhaca, ay kamid tahay kuwa ku saleysan naafanimada, iyo si loo sameeyo hab joogto ah ee loo xalliyo loogana hortago isku-dhac mustaqbalka ah.



Barnaamijka iyo Adeegyada

Wadahadal Fududeynta. Si looga jawaabo iskudhac iyo xiisada ka yimid eedeymo dambi naceyb ah iyo ka eexasho lagu sameeyo shaqsiyaad naafo ah ee bulshada katirsan, CRS waxay fududeysaa wadahadal lagu furayo xiriirka loona hagaajiyo wadaaga macluumaadka. Wadahadalalka waxaa loo sameyn karaa si ku haboon arrimaha gaarka ha ee saameynaya bulshada iyo shaqsiyaadkeeda naafada ayadoo looga dan leeyahay in la hormariyo fahanka arrimahan iskudhaca ee ka qeybgalayaasha si xal loogu helo.

Dhexdhexaadin. CRS waxay si tabarruc, oo asturan ku bixisaa qaab lagu caawiyo bulshada iyo dadka kale ee dayneynaya ee la kulmo iskudhac ama xiisada la xiriira eexasho iyo dambiyo naceyb ku saleysan naafanimada. Shaqaalaha Heshiisiinta ku taqasusay ee CRS waxay u adeegaan si dhexdhexaad ah oo ay uga caawiyaan kuwa ku leg leh helitaanka xal loo dhanyahay.

Madasha Dhacdooyinka Eexda iyo Dambiyada

Naceybka. CRS waxay qabtaan madal isku keenta hay'adaha nabad sugidda, wakaaladaha dowladda, iyo ururrada bulshada si loo wadaago siyaabaha ugu wanaagsan, la baro xubnaha bulshada sharciyada dambiyada naceybka iyo macluumaadka iyo in laga caawiyo bulshada ka hortago iyo ka jawaabida dambiyada naceybka ee la xiriira naafanimada, xiisadaha iyo iskudhaca si wax ku ool ah.

Wadatashi. CRS waxay la wadaagtaa iskoollada, wakaaladaha dowladda, hay'adaha nabad sugidda, kooxaha dadka u dooda, iyo kuwa kale sida ugu wanaagsan iyo macluumaadka ku saabsan sida loola dhaqmo shaqsiyaadka naafada ah, loo horumariyo xariirka shaqsiyaadka kamidka ah bulshadaa, iyo dhiiragelinta isdhexgalka iyo wax-wadaaga.

Waa Ayo CRS ▼

Waxaa lagu aasaasay sharciga Xuquuqda Shacabka 1964kii (Title X), waxaana lagu sii ballaariyay sharciga Kahortagga Dambiyada Naceybka Mathew Shepard iyo James Byrd, Jr., ee 2009kii. CRS waa “Nabadoonka Mareykanka” u ah bulshada soo wajahday xiisado ama isku-dhac ku saleysan kala duwanaanta midabka, asalka, sinjiga, sinjiga uu sheegto, diinta, iyo naafonimada. Ujeedka adeegyada CRS waa inay kor uqaado awooda bulshada ay si gooni ah iyo wadajir ah uga hortagaan una xaliyaan iskudhac mustaqbalka ayadoo la isticmaalayo sida xalinta dhibaataada, aqoon kordhin, iyo ka shaqeynta xiriirka.

Adeeyada iyo Barnaamijyada CRS ▼

CRS waxay siisaa bulshooyinka la kulmo xiisad, barnaamijyo gogoldhig u ah fahanka, hagaajinta wadashaqeynta, iyo kahortagga iska hor imaad mustaqbalka. Shaqaalaha CRS waa xirfadlayaal dhexdhexaadiyaal, tababarayaal, iyo la taliyayaal khibrad u leh isku keenka xubnaha bulshada si ay u hagaajiyaan awoodooda xalinta iskudhac jiro iyo ka hortagaan iskudhac mustaqbalka ah.

Xagee ka Shaqeynaa ▼

Xarunta CRS 📍

Washington, DC

Xafiisyada Gobolada CRS 📍

New England

Boston, MA

Waqooyi-bari

New York, NY

Atlantiga-Dhexe

Philadelphia, PA

Konfur-bari

Atlanta, GA

Galbeedka-dhexe

Chicago, IL

Konfur-galbeed

Dallas, TX

Dhexda

Kansas City, MO

Buuraleyda

Denver, CO

Galbeedka

Los Angeles, CA

Waqooyi-galbeed

Seattle, WA


Xafiisyada CRS ee Goobaha Shaqada 📍

Miami, FL

Houston, TX

Detroit, MI

San Francisco, CA



Naga hel, nagala soo xiriir ▼

www.justice.gov/crs



facebook.com/DOJCRS/



[@DOJ_CRIS](https://twitter.com/DOJ_CRIS)



askcrs@usdoj.gov



202.305.2935

Macluumaad barnaamijkan ee dheeri ah ama adeegyada kale ee CRS, fadlan la xiriir xafiiska CRS ee magaaladaada.

<https://www.justice.gov/crs/about-crs/regional-and-field-offices>